



ADEEGYADA DARYEEL BIXIYUHU KA BIXIYO GURIGA DHEXDIISA INTA LAGU JIRO SANAD DUGSIYEEDKA 2021-22

Ka socoto Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka



Saacadihii Wakhtiga Xagaaga oo La kordhiyay

Ilmahaagu wuxuu heli karaa saacadahiisa wakhtiga xagaaga ee la qiimeeyay ilaa laga helayo ogeysiin dheeraad ah. Tani waxay ka dhigan tahay in uu saacado daryeel oo dheeraad ku heli karo guriga marka loo eego sanad dugsiyeedka caadi ah. Ma jiraan wax xaddidaado ah oo ku saabsan marka ilme isticmaali karo taageerooyinka saacadlaha ah inta lagu jiro maalintii.

Taageerooyinku Waa Kuwo Gaar ah

Adeeg bixiyaha ayaa buuxinaya baahiyaha gaarka ah ee ilmahaaga, sida uu dhigayo Qorshaha Taageerada Shakhsi. Adeeg bixiyaha ayaa ka caawin kara waxyaabaha sida wax cunista, qaabka qofka loo dhigayo, lebisashada, wada xiriirka, nadaafada, taageerada hab-dhaqanka iyo baahiyaha caafimaadka la xiriira ee ka jira guriga ama bulshada dhexdeeda.



Waxbarashada Fog

Adeegyo la bixiyo ee la isticmaalayo adeegyada Naafanimada Koriinka ma beddeli karaan doorka waalidiinta ama macallimiinta. Adeeg bixiyaha looma adeegsan karo oo kaliya hawlaha la xiriira dugsiiga.

Su'aalaha? La xiriir Isku duwaha Adeegyada ee ilmahaaga wixii macluumaad dheeraad ah.

<https://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/ODDS-COVID-19-information.aspx>

July 20, 2021